17. Miyayna fiirinaynin sida Geela loo abuuray.

أَفَلَا يَنظُرُونَ إِلَى ٱلْإِبِلِ كَيْفَ خُلِقَتْ ﴿١٧﴾

18. Iyo sida Samada loo koryeelay.

وَإِلَى ٱلسَّمَآءِ كَيْفَ رُفِعَتْ ﴿١٨﴾

19. Iyo sida Buuraha loo taagay,

وَإِلَى ٱلْجِبَالِ كَيْفَ نُصِبَتْ ﴿١٩﴾

20. Iyo sida dhulka loo fidiyay.

وَإِلَى ٱلْأَرْضِ كَيْفَ سُطِحَتْ ﴿٢٠﴾

21. Ee Waani dadka waxaad tahay waaniyee (Nabiyow).

فَذَكِّرْ إِنَّمَآ أَنتَ مُذَكِّرٌ ﴿٢١﴾

22. Mana tihid mid xoog ku leh (qasab).

لَّسْتَ عَلَيْهِم بِمُصَيْطِرٍ ﴿٢٢﴾

23. Hase yeeshee Ruuxii xaqa ka jeedsada oo Gaalooba (ku soo celi xaqa).

إِلَّا مَن تَوَلَّىٰ وَكَفَرَ ﴿٢٣﴾

24. Eebana wuu caddibi Caddibaadda u wayn.

فَيُعَذِّبُهُ ٱللَّهُ ٱلْعَذَابَ ٱلْأَكْبَرَ ﴿٢٤﴾

25. Xagganagayna u soo noqon (khalqigu).

إِنَّ إِلَيْنَآ إِيَابَهُمْ ﴿٢٥﴾

26. Annagaana xisaabin.

ثُمَّ إِنَّ عَلَيْنَا حِسَابَهُم ﴿٢٦﴾

Waa in la fiiriyaa khalqiga Eebe laguna waana qaataa, Sida Cirka, Dhulka, Buuraha, Geela iyo Makhluuqaadka kalaba, Diinta Islaamkuna ma'aha qasab iyo dirqi ee waa uun waano, hase yeeshee Ruuxii xadgudba oo fasahaad la socda waa la qaban, isagooy u dambayso tii Aakhirana, Hadalla wuxuu ku dhanyahay in Eeba loo noqon uuna xisaabin.
Waxaa laga wariyay Abuu UMAAME inuu maray Khaalid Bini Yaziid Binu Macaawiye, markaasuu waydiiyay Kalimadii ugu jilicsanayd ees ka maqlay Rasuulkii-Rasuuli Eebe Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee, wuxuuna yidhi: waxaan Rasuulkii Eebe Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha yeelee: Maqlay isagoo leh: « Dhammaantiin Jannadaad Galaysaan Ruux Eeba Ka Carara Mooyeen Sida Neef Geela Ehelkiisa Uga Cararo ». waxaa wariya-y Imaamu Axmad. Al-Ghaashiyah (17-26).

## Suurat Al-Fajr سُورَةُ الفَجْرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Waabariga.

وَٱلْفَجْرِ ﴿١﴾

2. Iyo Habeennada Tobanka ah (Arrafo).

وَلَيَالٍ عَشْرٍ ٢

3. Iyo Tirada siman iyo tan is dheer.

وَٱلشَّفْعِ وَٱلْوَتْرِ ٣

4. Iyo Habeenku markuu tagayo.

وَٱلَّيْلِ إِذَا يَسْرِ ٤

5. Miyayna arrintaasu ahayn wax loogu dhaarto Qof caqli leh.

هَلْ فِى ذَٰلِكَ قَسَمٌ لِّذِى حِجْرٍ ٥

6. Ma ku soo Gaadhay sida Eebahaa ku falay Caad.

أَلَمْ تَرَ كَيْفَ فَعَلَ رَبُّكَ بِعَادٍ ٦

7. Ee ahaa Irama xooggana lahaa.

إِرَمَ ذَاتِ ٱلْعِمَادِ ٧

8. Wax la mid ahna aan lugu abuurin dhulka.

ٱلَّتِى لَمْ يُخْلَقْ مِثْلُهَا فِى ٱلْبِلَٰدِ ٨

9. Iyo Thamuud-kii ahaa dhagaxa kuwa ku jarjara Waadiga.

وَثَمُودَ ٱلَّذِينَ جَابُوا۟ ٱلصَّخْرَ بِٱلْوَادِ ٩

10. Iyo Fircoonkii dhakawyada lahaa.

وَفِرْعَوْنَ ذِى ٱلْأَوْتَادِ ١٠

11. kuwiina ahaa ku xadgudbay dhulka.

ٱلَّذِينَ طَغَوْا۟ فِى ٱلْبِلَٰدِ ١١

12. Kuna badiyay dhexdiisa fasaadka.

فَأَكْثَرُوا۟ فِيهَا ٱلْفَسَادَ ١٢

13. Markaasaana Eeba ku shubay Caddibaad daran.

فَصَبَّ عَلَيْهِمْ رَبُّكَ سَوْطَ عَذَابٍ ١٣

14. Maxaayeelay Eebe waa u darbanyahay (abaalmarinta).

إِنَّ رَبَّكَ لَبِٱلْمِرْصَادِ ١٤

Eebe wuxuu abaal-mariyay halaagayna kuwii Xaq-diidayaasha ahaa Nabiyadana beeniyay, isna biday xoog iyo tabar, Ruux kastoo is kibriyana oo xumaan iyo fasaad dhulka ku sameeyana wuxuu la kulmi waxay la kulmeen, wuxuuna ka cabbi weelkay ka cabbeen, taasina waa Sunnada Eebe wax baddalina ma jiro. Al-Fajr (1-14).

---

15. Marka Eebe Dadka imtixaano xoolana ugu nicmeeyo wuxuu dhihi (kan xun) waa la i sharrifay (isagoo faani).

فَأَمَّا ٱلْإِنسَٰنُ إِذَا مَا ٱبْتَلَىٰهُ رَبُّهُۥ فَأَكْرَمَهُۥ وَنَعَّمَهُۥ فَيَقُولُ رَبِّىٓ أَكْرَمَنِ ١٥

16. Haddiise Eebe imtixaano oo Xoolaha ku yareeyo wuxuu dhihi Eebaa i dulleeyay.

وَأَمَّآ إِذَا مَا ٱبْتَلَىٰهُ فَقَدَرَ عَلَيْهِ رِزْقَهُۥ فَيَقُولُ رَبِّىٓ أَهَٰنَنِ ١٦

17. Saas ma aha ee waxaydaan dhaqaalaynayn Agoonka.

كَلَّاۖ بَل لَّا تُكۡرِمُونَ ٱلۡيَتِيمَ ١٧

18. Mana fartaan in masaakiinta wax la siiyo.

وَلَا تَحَٰٓضُّونَ عَلَىٰ طَعَامِ ٱلۡمِسۡكِينِ ١٨

19. Waxaadna aad u cuntaan dhaxal xaq darro.

وَتَأۡكُلُونَ ٱلتُّرَاثَ أَكۡلٗا لَّمّٗا ١٩

20. Xoolahana waxaad u jeceshihiin si daran.

وَتُحِبُّونَ ٱلۡمَالَ حُبّٗا جَمّٗا ٢٠

21. Saas ma aha ee marka dhulka la burburiyo.

كَلَّآۖ إِذَا دُكَّتِ ٱلۡأَرۡضُ دَكّٗا دَكّٗا ٢١

22. Eebe iyo Malaguna la yimaaddo amarkiisa Malaa'igtoo safan.

وَجَآءَ رَبُّكَ وَٱلۡمَلَكُ صَفّٗا صَفّٗا ٢٢

23. Naarta Jahannamana Maalintaas la keeno, Dadku waxay xusuusan waxay faleen, Maxayse xusuusi tari.

وَجِاْيٓءَ يَوۡمَئِذِۭ بِجَهَنَّمَۚ يَوۡمَئِذٖ يَتَذَكَّرُ ٱلۡإِنسَٰنُ وَأَنَّىٰ لَهُ ٱلذِّكۡرَىٰ ٢٣

24. Waxay dhihi shallaytee maan wanaag hormarsado.

يَقُولُ يَٰلَيۡتَنِي قَدَّمۡتُ لِحَيَاتِي ٢٤

25. Maalintaas sida Eebe wax ruux u Cadaabi ma jiro.

فَيَوۡمَئِذٖ لَّا يُعَذِّبُ عَذَابَهُۥٓ أَحَدٞ ٢٥

26. Wax sida Eebe wax u xidhina ma jiro.

وَلَا يُوثِقُ وَثَاقَهُۥٓ أَحَدٞ ٢٦

27. Naftase xaqa rumaysay ee Xasillooneey.

يَٰٓأَيَّتُهَا ٱلنَّفۡسُ ٱلۡمُطۡمَئِنَّةُ ٢٧

28. U noqo Eebahaa adoo raalli ah lagana raalli noqday.

ٱرۡجِعِيٓ إِلَىٰ رَبِّكِ رَاضِيَةٗ مَّرۡضِيَّةٗ ٢٨

29. dhexgalna Addoomadayda (wanaagsan).

فَٱدۡخُلِي فِي عِبَٰدِي ٢٩

30. Galna Jannadayda.

وَٱدۡخُلِي جَنَّتِي ٣٠

Xoola badnida iyo Saboolnimaduba waa imtixaan Eebe, mana aha Jacayl Eebe iyo nebcaansho midna, Saas daraaddeed waa in wax bixinta lays faro, lana dhaqaaleeyo Agoonta iyo Masaakiinta, Booli cuniddana la-yska jiro.
Nabiguna wuxuu yidhi «Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: «Guriga ugu khayrbadan Muslimiinta wa Guriga Agoon loogu sama falo, Guriga ugu sharbadan muslimiintana waa Guri Agoon lagu xumeeyo». Waxaa laga wariyay Cabdullaahi Ibnu Mubaarak.
Saa daraadeed waa in wanaag la hor marsadaa si raalli aha-anshaha Eebe iyo Jannadiisa loo helo'iyo Naf xasilloon, illen Qiyaame iyo xisaabbaa dambaysee. Al-Fajr (15-30).